

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND



**QABYO -QORAALKA XEERKA  
ILAALINTA XUQUUQDA CARRUURTA**

**FINAL DRAFT 0.4**

## TUSMADA XEERKA

CUTUBKA KOOWAAD .....	3
QODOBBADA GUUD.....	3
Qodobka 1aad .....	4
Earay-bixinno .....	4
Qodobka 2aad. ....	7
Magaca Xeerka .....	7
Qodobka 3aad .....	7
Ujeeddooyinka Xeerka .....	7
Qodobka 4aad .....	7
Xayndaabka Dabbaqaadda Xeerka .....	7
Qodobka 5aad .....	7
Waafaqsanaanta Dastuurka.....	7
CUTUBKA LABAAD.....	7
MAS'UULIYADAHА .....	7
Qodobka 6aad .....	7
Mas'uuliyadda Guud .....	7
Qodobka 7aad .....	8
Mas'uuliyadda Gaarka ah .....	8
Qodobka 8aad .....	8
Xaqa Cadaynta Waalidnimida .....	8
Qodobka 9aad .....	8
Mas'uuliyadda Qoyska .....	8
Qodobka 10aad .....	9
Danta U Wanaagsan Ilmaha .....	9
Qodobka 11aad .....	9
Xaqa Ixtiraamka .....	9
CUTUBKA SADDEXAAD .....	9
XUQUUQAHA GUUD.....	9
Qodobka 12aad .....	9
Xaqa Daryeel Waalidnimo .....	9
Qodobka 13aad .....	10
Xuquuqaha Aas-aasigga Ah .....	10
Qodobka 14aad .....	10
Xaqa Nolosha, Badbaadada Iyo Horumarka .....	10
Qodobka 15aad .....	10
Xaqa In Laga Ilaaliyo Dayacaadda .....	10
Qodobka 16aad .....	11
Xaqa Xorriyadda Iyo Amniga Ilmaha .....	11
Qodobka 17aad .....	11
Xaqa Diiwaangelinta Dhalashada .....	11
Qodobka 18aad .....	11
Xaqa Islaamnida .....	11
QAYBTA LABAAD.....	11
XUQUUQAHA BARBAARINTA.....	11
Qodobka 19aad .....	11
Xaqa Barbaarinta .....	11
Qodobka 20aad .....	12

Xaqa Magaca, Dhalashada Iyo Aqoona.....	12
Qodobka 21aad .....	12
Xaqa Waxbarashada.....	12
Qodobka 22aad .....	12
Xaqa Sinaanshaha .....	12
<b>CUTUBKA AFRAAD .....</b>	<b>12</b>
<b>DARYEELKA GAARKA AH.....</b>	<b>12</b>
Qodobka 23aad .....	12
Xaqa Daryeel Waalidnimo .....	12
Qodobka 24aad .....	13
Xaqa Ilaalinta Carruurta Baahiyaha Gaarka ah Qaba .....	13
Qodobka 25aad .....	13
Xaqa Nasashada Iyo Ciyaarta .....	13
Qodobka 26aad .....	13
Xaqa Noolsha Gaarka Ah .....	13
Qodobka 27aad .....	14
Xaqa Kafaalo-qaadashada Ilmaha .....	14
Qodobka 27aad .....	14
Xaqa Adeegyada Caafimaad .....	14
Qodobka 28aad .....	14
Xaqa in Laga Ilaaliyo Jidh Dilka, Hab Dhaqanka Banii Adantimanada	
Ku Xun Ama Sharaf Dilka Ah .....	14
Qodobka 29aad .....	14
Xaqa in Laga Ilaaliyo Xad Gudubka .....	14
Qodobka 30aad .....	15
Xaqa Kaydinta Xogaha iyo Warbixinta Tacadiyadda .....	15
<b>CUTUBKA SHANAAD .....</b>	<b>15</b>
<b>XAQA ADEEGGA KAALMO SHARCI .....</b>	<b>15</b>
Qodobka 31aad .....	15
Xaqa Ilmuu U Leeyahay Kaalmo Sharci Oo Bilaash Ah .....	15
Qodobka 32aad .....	16
Gudidda Qaran Ee Ilaalinta Xuququda Carruurta .....	16
Qodobka 33aad .....	16
Xilka iyo Waajibaadka Guddida Qaran Ee Ilaalintaa Xuquuqda Carruurta.....	16
<b>CUTUBKA LIXAAD .....</b>	<b>17</b>
<b>DANBIYADA IYO CIQAABAHA .....</b>	<b>17</b>
Qodobka 34aad .....	17
Danbiyada Lagu Soo Oogo Carruurta Iyo Ciqaabaha.....	17
Qodobka 35aad .....	17
Danbiyada Laga Galo Carruurta Iyo Ciqaabaha Ka Dhalanaya.....	17
Qodobka 36aad .....	17
Laalis Iyo Tirtirid.....	17
Qodobka 37aad .....	17
Awooodda Soo Saarista Xeer-Nidaamiyayaal .....	17



**CUTUBKA KOOWAAD  
QODOBBADA GUUD**

**Qodobka 1aad  
Earay-bixinno**

Haddii aanu xeerku si kale u fasirin erayadan waxaa loola jeeda sidan

Dastuur:	Waxaa loola jeeda Dastuurka JSL
Xeerarka Dhaqan-Galka Ah:	Waxa looga jeedaa Xeerarka dhalinaya waajbka sharci ee ansaxay
Wasaarad:	Waxaa loola Jeedaa Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
Wasiir	Waxaa loola Jeedaa Wasiirka Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arrimaha Bulshada iyo Qoyska
Ilme	Waxaa loola jeedaa ilmaha aan gaadhin da'ada qaan-gaadhka
Siyaasad	Waxaa loola jeedaa siyyasadda Caruurta
Qafalasho	waxaa loola jeedaa Ilmo si sharci darro ah looga qaado ilme yar goobta uu degan yahay iyada oo loo adeegsanayo xoog, hanjabaad, khiyaamo, awood si xun u isticmaalid, ama xod xodasho iyada oo la gaynayo goob ay maamusho cidda qaadatay ama cid kale
Dalka Debeddiisa	Waxa looga jeedaa goob kasta oo baxsan geyiga Somaliland
Daryeel Caafimaad Oo Aasaasi Ah	Waxaa loola jeedaa baadhitaanka, dawaynta iyo ka hortagga cuduradda, xanuunka iyo dhaawaca
Danta U Wanaagsan Ee Ilamaha: Daryeele	Waxaa loola jeedaa wixa looga jeedaa sida ku qexan qodobka 6aad ee Xeerkan
Ku Xadgudub Ilme	Waxa looga jeedaa qof kasta oo aan ahayn waalid ama ilaaliye (guardian) oo si xaqiiji ah u daryeela ilme si joogto ah ama ku meel gaadh ah iyada oo ay isu keentay xidhiidh xirfadeed ama mid aan ahayn xirfad.
Caruurta Sharciga Khilaafتا	Waxa looga jeedaa fici kasta si ku tala-gal ah loogu wax yeelanaynayo ilmo waxaa loola jeedaa caruurta lagu soo eedeeyey ama loo aqoosan yahay inay



Ku Shaqaysi Caruur  
(Child Labour):

jebiyeen xeer cizaabeed.

Waaxa loola jeeda shaqooyinka aan ku habboonayn carruurta ee loo diro, sida macdan qodista; Xamaalidda alaabta culus, Shaqada culus ee beeraha, Shaqada dhismaha, Shaqada wershedaha iyo Shaqada goobaha loo isticmaalo qalabka culus;

Guursiga Ilme"  
Ama "Guurka  
Degdegga Ah:

waxaa looga jeedaa in loo guuriyo qof ka yar da'da qaan-gaadalka

Gurigga Caruurta

waxaa looga jeedaa hoy daryeel Qaranka ama urur caruurta ilaaliyaa ku siiyo caruurta aan awood u lahayn inay helaan daryeel waalid ama daryeel qoys kale waxa looga jeedaa xaqa uu u leeyahay waalidka aan xadaanada lahayn ama xubin qoyska ka mid ahi inuu la xidhiidho ilme; niyad dillidda" oo ah qaab ku xadgudub dareen waxa looga jeedaa in loo dhaliilo ilme si aan xaq ahayn oo adag; yasid ama ka dhigid ilmaha qof qiime yar.

Furrin

waa si sharci ah u dhamaynta guur burburay;

Ilme Dhibane  
Ama Marag Ah

Waxaa loola jeedaa ilmaha aan gaadhin da'ada qaan-gaadalka oo ka ah dhibane ama marag dembi iyada oo aan la eegayn doorka uu ku leeyahay dembiga ama dacwad ku oogista eedaysanaha ama kooxda eedaysanayaasha ah

Qofka Xaq U Leh

marka lagu dhawaaqayo aabanimo ama waalidnimo si waafaqsan xeerkana waxa looga jeedaa waalidka ilme, ilaaliyaha iyo ilmaha laftiisa ama isaga oo uu caawimayo ilaaliye sharci, xubin qoyska ama taageere dawladeed

Xadgudub Dareen

Waxaa loola jeeda waxyeelo wayn caafimaadka ama jidhka, maskaxda, ruuxda ama mooralka ama horumarka bulsho ee ilmaha. Wuxaan ka mid ah

Xubin Qoys

Waxaa loola jeeda qof aan ahayn waalidka, waa qofka la leh ilmaha xidhiidh dhiig ama guur sida awoow, ayeeyo, eedo, habaryar, adeer, abti ilama adeer, ilma abti,

Guur Qasab Ah

habarwadaag, walaal.

Tacadigga Ku  
Salaysan Jinisga

Waxaa looga jeedaa in la guursado qof iyada oo aanu bixin ogolaasho cad

waxa looga jeedaa tacadigga lagula kaco qof si ku salaysan jinsigiisa. Waxa ku jira dhamaan noocyada kala duwan ee xadgudubka iyo dhiigmiirashada galmo, kufisga, dhilaysiga, xadgudub ninku u gaysto xaaskiisa, guurka degdeggaa ah ama qasabka ah iyo dhaqamada kale ee waxyelada leh.

Ilaaliye

waxa looga jeedaa qof kasta oo aan ahayn waalid oo loo magacaabay inuu guto masuuliyadda waalidnimo uuna siiyo daryeel ilme marka ay dhintaan waalidkiisu ama midkood dhinto ama ilmuu aanu lahayn waalid siiya daryeel ku filan.

War-Baahina  
Waxyelada Leh"

Waxaa loola jeeda wixii daabacan, filimada, cayaaraha fiidyowga ah muusingga, war lalisyada (broadcasts) ama noocyada kale ee warbaahinta elektrooniga ah ama qoran kuwaas oo waxyeelo ku ah ilmaha badqabkiisa, caafimaadkiisa, horumarkiisa ama fayo-qabksiisa dareen

Ilme Dalka  
Gudihiisa Ku  
Baro Kacay

waa ilmaha lagu qasbay ama ay waajib ku noqtay inuu ka cararo gurigiisa ama goobtiisa degenaanshaha rasmiga ah uu ku leeyahay gaar ahaan si uu uga fakado saamaynta colaad hubaysan, xaalad rabshado guud, ku tacaddi xuquuqal insaan ama masiibo dad samee ah ama mid dabeeeci ah, islamarkaana aan ka gudbin xuduudda caalamiga ah ee Qaranka.

Shaqo Fudud

Waxaa looga jeedaa shaqada aan u gaysanayn waxyeelo caafimaadka ama horumarka ilmaha islamarkaana aan saamayn ku yeelanayn in ilmuu tago dugsi ama awoodda in ilmuu ka faa'iido dugsiga. Waxa ku jiri kara hawlaha laga qabto aqalka gudihiisa (household activities)

Dawlad Hoose

Waxaa looga jeedaa dawlad hoos ee magaalo oo leh jiritaankeeda gaarka ah.

**Qodobka 2aad.  
Magaca Xeerka**

Xeerkan waxa loogu yeedhaya Xeerka ilaalinta Xuquuqda Caruurta

**Qodobka 3aad  
Ujeeddooyinka Xeerka**

Ujeeddooyinka xeerku xambaarsan yahay waxaa ka mid ah

1. In la helo hannaan sharci oo ilaaliya xuquuqda carruurta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka JSL, Xeerarka kale ee dhaqan-galka ah iyo Mucaahadada Qarammada Midoobay ee Xuquuqda Carruurta;
2. In la helo xeer Tilmaamaya mas'uuliyadda guud iyo gaar ahaaneed ee lagu ilaalinayo xuquuqda carruurta;
3. In la helo xeer Xaqijinaya isla markaana jidaynaya horumarka daryeelka caruurta

**Qodobka 4aad  
Xayndaabka Dabbaqaadda Xeerka**

Xeerkan waxaa lagu dabbaqayaa carruurta ku dhaqan Dalka Jamhuuriyadda Somaliland

**Qodobka 5aad  
Waafaqsanaanta Dastuurka**

Xeerakni wuxuu waafaqsanyahay mabaa'diida guud ee dastuurka ee la xidhiidha daryeelka iyo ilaalinta xuquuqda, gaar ahaan qodobka 10aad (2) iyo Qodobka 19aad Ee Dastuurka JSL

**CUTUBKA LABAAD  
MAS'UULIYADAHA**

**Qodobka 6aad  
Mas'uuliyadda Guud**

1. Mas'uuliyadda Guud ee ilaalinta xuquuqda carruurtu waxaa u xil saaran dawladda JSL
2. Dawladdu waxay xilkeeda u gudanaysaa si waafaqsan shareecada islamka, dastuurka, xeerarka dhaqan-galka ah iyo

mabaa'diida guud ee la xidhiidha ilalinta xuquuqda carruurta ee aan ka hor imanayn shareecada islaamka iyo dastuurka

3. Wasaaradda Shaqo-galinta Arrimaha Bulshada iyo Qoyska ayaa leh mas'uuliyadda guuud ee ilaalinta iyo daryeelka xuquuqda carruurta iyo dhaqan-galinta xeerkan iyada oo kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso
4. Wasaaraddu xilkeeda waxay u gudanaysaa si waafaqsan waajibaakeeda ku tilmaaman xeerkan iyo xeerarka kale
5. Wasaaraddu waxay abuuraysaa hannaan kasta, qaabdhismed kasta iyo hal-beeg kasta oo lagu ilaalin karo xuquuqda carruurta

### **Qodobka 7aad Mas'uuliyadda Gaarka ah**

1. Mas'uuliyadda Gaarka ah ee ilaalinta xuquuqda Carruurta waxaa xil ka saaran yahay waalidka ilmaha ama daryeelaha ilmaha gacanta ku haya
2. Waalidka ilmuu wuxuu mas'uuliyaddiisa u gudanaya si waafaqsan Shareecada Islaamka, dastuurka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ka hor imanayn diinta islaamka
3. Waalidku wuxuu mas'uuliyaddiisa u kala gudanayaan sida ay shareecadu ugu xadaysay.

### **Qodobka 8aad Xaqa Cadaynta Waalidnimida**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in loo caddeeyo waalidka dhalay dhalay haddii ay dhacdo xaaladahan soo socdaa,
  - a. Haddii laba qoys ama laba qof isku qabsadaan ilmaha
  - b. Caddaynta waalidnimo waxay saarantahay qofka ama qoyska sheeganaya iyada oo lagu xaqiijinayo caddaymaha hidde-sideha (DNA)

### **Qodobka 9aad Mas'uuliyadda Qoyska**

1. Marka ay ilmaha waalidkiisu dhintaan ama aanay awood u lahay in ay daryeelaan, mas'uuliyadda waalidnimo waxay u wareegaysa ehelka ilmaha iyada oo loo kala horraysiinayo sida ay u shareecadu jidaysay.

## **Qodobka 10aad Danta U Wanaagsan Ilmaha**

1. Danta u wanaagsan ee ilmaha waa in mar walba la siiyaa tixgelinta kowaad marka ay qaadanayaan talaabo la xidhiidha caruuurta Maxkamad ama hay'ad dawladeed (heer qaran, heer gobol iyo heer degmo ba) ama qof kasta oo kale oo go'aan ka gaadhaya arin la xidhiidha korriimada ama daryeelka ilme ama maamulidda hantida ilmaha ama dakhli kasta oo ay dhasho.

2. Marka ay go'aan ka gaadhayso Maxkamad ama hay'ad kale oo awood u lihi danta u wanaagsan ee ilmaha waa in tixgelinta la siiyaa daryeelka ilmaha gaar ahaan:

- a. Rabiitaanka iyo dareenada la rumayn karo ee ilamaha ay khuseeyso (iyada oo la eegayo da'da iyo fahamka ilmaha);
- b. Saamaynta ay ku yeelan karto isbedelka lagu sameeyo duruuftiisa;
- c. Da'adiisa, rag iyo dumar midkuu yahay, aqoonsigiisa sinjiyeed, diimeed iyo dhaqan, taariikhdiisa hore iyo astaamaha kale ee u muuqda inay ku haboon yihiin;
- d. Ilaalinta xaqa ilmuu u leeyahay nolol, horumar, caafimaad iyo badqab, islamarkaana damaanad qaadka sharafta, magic-samida, aqoonsiga iyo shaqsiyadda ilmuu waa ujeeddada aasaasiga ah ee fal kasta;

## **Qodobka 11aad Xaqa Ixtiraamka**

1. Dhammaan ficillada iyo hab-raaca go'aan gaadhista ee la qaato iyada oo la dabaqayo Xeerkan, gaar ahaan dacwadaha idaariga ah iyo kuwa garsoor, aragtiyaha iyo rabitaanka ilmaha waa in la tixgeliyaa iyada oo la eegayo da'diisa iyo qaangaadhnimadiisa.

2. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu raadsado, helo, gudibiyo xog iyo aragti ka turjumaysa xadka shareecada iyo dhaqanka wanaagsan.

## **CUTUBKA SADDEXAAD XUQUUQAHU GUUD**

## **Qodobka 12aad Xaqa Daryeel Waalidnimo**

Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu la noolaado oo ay daryeelaan waalidkii haddii aanay ka degin mas'uuliyaddii waalidnimo ee shareecadu u jidaysay

**Qodobka 13aad**  
**Xuquuqaha Aas-aasigga Ah**

1. Carruurtu waxay leeyihiiin xuquuqaha aas-aasiga ah ee ku tilmaaman shareecada islaamka
2. Carruurtu si la siman bulshada inteeda kale waxay xaq u leeyihiiin xuquuqaha aas-aasiga ah ee kala duwan ee dastuurka jideeyay

**Qodobka 14aad**  
**Xaqa Nolosha, Badbaadada Iyo Horumarka**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu noolaado.
2. Ilaalinta nolosha ilmuu waa inay noqotaa waajibka kowaad ee saaran qof kasta oo ay ku waajibtay mas'uuliyadda gaarka ah, hay'ad kasta oo leh mas'uuliyadda guud ee la xidhiidha ilaalinta xuquuqda carruurta.
3. Xaqa ilmaha ee badbaadada iyo horumarka oo ah fayo qabka (well-being) iyo horumarka jidheed, maskaxeed iyo nafsi, dareen, iyo bulsho ee ilmaha, waa in loo ilaaliyaa xadka ugu badan ee suurtagalka ah.
4. Waa mas'uuliyad saaran waalidka caruurta, qoyska, dadka waa wayn iyo dawladda inay kobciyaan oo daryeelaan si uu ilmuu u badbaado una horumaro.

**Qodobka 15aad**  
**Xaqa In Laga Ilaaliyo Dayacaadda**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in aan la dayicin dhammaan qaybaha kala duwan noloshiisa sida daryeel waalidnimo, koriinka jidh ahaaneed, maskax ahaaneed, daryeelka caafimaadkiisa, waxbarashadiisa, iyo xuquuqaha kale ee xeerku jideeyay iyo sifo kasta oo u muuqda in ay dan u tahay ilmaha oo aan ka hor imanayn xeerka.
2. Sababaha iyo saamaynta dayacaadda waa inay qiimeeyaan hawl-wadeennada u xil-saaran ilaalinta iyo daryeelka Carruurta ee Wasaaradda Shaqo-galinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska
3. Guddiyada Xuquuqda Carruurta ee heer qaran iyo heer gobol waa inay qorsheeyaan oo ay kobciyaan ololayaal wacyigelineed oo ku aadan dayacaadda.

**Qodobka 16aad**  
**Xaqa Xorriyadda Iyo Amniga Ilmaha**

1. Ilme kastaa wuxuu leeyahay xaqa xorriyadda iyo amniga qof ahaaneed.
2. Ilme lama farogelin karo, xidhi karo, qaban karo, lagama qaadi karo xorriyadiisa haddii aanay jirin sababo cayiman oo ah talaabadii ugu danbaysay iyada oo la haynayo mudada ugu yar ee suurtagalka ah loona raacayo hannaan ku dhigan Xeerkana ama xeer kale oo dhaqan gal ah.

**Qodobka 17aad**  
**Xaqa Diiwaangelinta Dhalashada**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in ay dawladdda ama cidda ay u wakiilatay diiwaangeliso dhalashadiisa.
2. Diiwaangelinta Dhalashada ilmaha waxaa loo raacaya si waafaqsan xeerka

**Qodobka 18aad**  
**Xaqa Islaamnida**

1. Carruurtu waxay xaq u leeyihii in loo ilaaliyo shaca'a'irta islaamiga ah iyo ku toosnaanta diinta suubban xilliga korinta iyo ka hor inta aanay qaan-gaadhin ee mas'uuliyaddooda gaarka ah waalidku gacanta ku hayo
2. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac aan ka hor imanayn sifooyinka shareecadu inoo jidaysay si u bulshada astaamo wanaagsan ugu dhex lahaado

**QAYBTA LABAAD**  
**XUQUUQAHAD BARBAARINTA**

**Qodobka 19aad**  
**Xaqa Barbaarinta**

Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay.

1. In lagu barbaariyo dhaqan wanaagsan iyo ku toosnaanta diinta suubban
2. In lagu barbaariyo adeecidda waalidka, dadka waaweyn iyo cid kasta ka mudan ixtiraam,
3. In lagu barbaariyo baarinimo iyo mas'uuliyad gudasho si marka uu waynaado uu uguto mas'uuliyadaha ka saaran shareecada islaamka iyo danihiisa gaarkaa ah.



**Qodobka 20aad**  
**Xaqa Magaca, Dhalashada Iyo Aqoonsiga**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in si rasmi ah magac loogu bixiyo.
2. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu helo dhalasho si waafaqsan Xeerka Jinsiyadda iyo dastuurka.
3. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay inu haysto aqoonsigiisa oo ay ka mid tahay haysashada magaciisa, dhalashadiisa iyo xidiidhkiisa qoys iyada oo wax farogelin ah aanay kaga iman cid kasta.

**Qodobka 21aad**  
**Xaqa Waxbarashada**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo waxbarasho diimeed iyo mid maaddi ahba oo aa-aasi ah
2. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo fursado waxbarsho si uu u anfaco noloshiisa danbe
3. Dawladda ayaa xil ka saaran yahay sidii carruurta aan dhaafin da'da waxbarashada ay u heli lahaayeen waxbarasho aas-aasi ah

**Qodobka 22aad**  
**Xaqa Sinaanshaha**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in si la siman ubadka kale ee jidh ahaan iyo maskax ahaan fayow loo daryeelo
2. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in aan lagu faquuqin abuurka u gaarka ah, dabeecaddiisa, lab, dheddig, qabiilkiiisa iyo xaaladdiisa nololeed

**CUTUBKA AFRAAD**  
**DARYEELKA GAARKA AH**

**Qodobka 23aad**  
**Xaqa Daryeel Waalidnimo**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo daryeel waalidnimo oo dhamaystiran, sida daryeel waxbarasho, daryeel caafimaad iyo daryeel nololeed
2. Ilmaha aan lahayn labadiisa waalid wuxuu xaq u leeyahay in uu helo daryeel waalidnimo oo dhammaystiran iyada oo mudnaanta la siinayo eheladiisa si waafaqsan qodobka 9(3aad)
3. Dawladda waxaa waajib ku ah in ay samayso qoysas iyo

xarumo lagu daryeelo carruurta si ku meel-gaad ah iyo in ay helaan waalid nuujiya

4. Dawladda waxaa ku waajib ah in ay gacan siiso qoysaska ama cidkasta oo daryeelaysa carruurta aan daryeel waalidnimo haysan
5. Wasaaraddu waa in ay dejisaa hal-beegyo iyo hagayaal ay ku kor-joogtaynayo daryelayaasha carruurta gacanta ku haya
6. Ilmaha ku jira xaaladda daryeelka wuxuu xaq u leeyahay in aan dalka dibeddiisa loo dhoofin Karin, deegaan kale la gayn Karin iyada oo aan ogolaansho maxkamadeed loo haysan.
7. Hadii ilme ku jira xaalad daryeel uu soo gaadho dhaawac culus ama xad-gudub, daryeelahaa waxaa waajib ku ah ka war-bixinta xaaladda ilmaha sidoo kale waa inuu islamarkaaba warbixinta gaadhsiiyaa hawl-wadeennada wasaaradda u xil saaran **ilaalinta xuquuqda** carruurta iyo hay'daha sharci fulineed ee ay waajib ku tahay inay sameeyaan baadhitaan la xidhiidha dhaawaca iyo xadgudubka.

### **Qodobka 24aad Xaqa Ilaalinta Carruurta Baahiyaha Gaarka ah Qaba**

1. Ilme kasta oo leh baahi gaar ah sida, ilmaha aan daryeel waalidnimo haysan, suuqa ku nool, darbi-jiifka ah, xanuunnada la nool, naafada ah, barakacayaasha ah, qaxoontiga ah, socotada ah, iyo xaalad kasta oo loo arki karo in ilmuu u nugul yahay una muuqata baahi gaar ah wuxuu xagu u leeyahay
  - a. In uu helo daryeel gaar ahaaneed
  - b. In aan lagu faquuqin baahidiisa gaarka ah  
In si dhammaystiran u helo adeegyada bulshada sida, waxxbarashada, caadfimaadka, goobaha ciyaaraha iyo nasashada.
  - c. In aan looga faa'iidaysan baahidooda gaarka ah

### **Qodobka 25aad Xaqa Nasashada Iyo Ciyaarta**

1. Dawladdu iyada oo gudanaysa mas'uuliyadda guud ee ka saaran ilaalinta xuquuqda carruurta waa inay:
  - d. Abuurtaa goobaha ciyaaraha iyo nasashada ee carruurta ku haboon horumarika jidh ahaaneed iyo maskax ahaaneed.
  - e. Kobcisaa ka qaybgalka carruurta ee ciyaaraha, dhacdooyinka dhaqan, fanka iyo hawlahaa kale ee barbaraarinta habboon;

### **Qodobka 26aad Xaqa Noolsha Gaarka Ah**

1. Xogaha ilmaha ee noloshiisa gaarka ah waa in laga ilaaliyaa farogelinta xun, ama sharci darrada ah ee ku keeni karta waxyeello sharafeed, magic-samidda iyo sumcadda ilmaha.

**Qodobka 27aad**  
**Xaqa Kafaalo-qaadashada Ilmaha**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo cid kafaalo qaadata haddii ay jirto cid si gaar ah u doonaysa in ay qaado mas'uuliyadda daryeelka iyo barbaarinta ilmaha
2. Cid kasta oo doonaysa in ay ka faala-qaadato ilme ama carruur waxaa looga baahan yahay in uu ku sifoobay
  - a. Islaamnimo
  - b. Yahay Muwaaddin
  - c. Dhaqan-wanaagsan
  - d. Iyo in uu leeyahay awood mas'uuliyadeed oo uu ilmaha ama carruurta ku kaafao-qaadato
3. Faah-faahinta habka kafaala-qaadashada iyo hannaanka lagu xaqijinkaro kafaalo-qaadashada waxaa loo raacayaa habka ka faalo qaadashada ee shareecadu jidaysay, mucaahadada caalamiga ah ee xuquuqda carruurta iyo hagaha daryeelka carruurta aan daryeel waalidnimo haysan.

**Qodobka 28aad**  
**Xaqa Adeegyada Caafimaad**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo adeeg caafimaad marka ay la soo gudboonaato xaalad caafimaad oo u muuqan karta mid aan daawo lahayn
2. Dawladdu waa inay damaanad qaaddaa adeegyada caafimaad ee ilmuu u baahan yahay xilliga ay ilamaha la soo darsaan xaaladaha caafimaad ee faqradda hore ku tilaaman
4. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo talaallada lagaga hortago xanuunnada faafa

**Qodobka 29aad**  
**Xaqa in Laga Ilaaliyo Jidh Dilka, Hab Dhaqanka Banii**  
**Adantimanada Ku Xun Ama Sharaf Dilka Ah**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq ugu leeyahay dawladda, waalidkii, ilaaliyaha, daryeel bixiyaha, macalimiinta, booliska ama cid kasta oo kale oo masuul ka ah ilaalinta ilmaha inay ka ilaaliyaan dhamaan falalka xad-gudubka ah, isticmaalka maandooriyaha iyo waxyeelo dareen, dayacaad ama dhiig-miirasho.

**Qodobka 30aad**  
**Xaqa in Laga Ilaaliyo Xad Gudubka**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq ugu leeyahay waalidkii, dawladda, ilaaliyaha, daryeel bixiyaha, macallimiinta, booliska ama cid kasta oo

kale oo mas'uul ka ah ilaalinta ilmaha inay ka ilaaliyaan dhamaan falalka u dhigma xad gudub jidheed iyo waxyeelo dareen

2. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in laga fogeeyo qafaalashada, ama dhoofinta (trafficking)

**Qodobka 31aad**  
**Xaqa Kaydinta Xogaha iyo Warbixinta Tacadiyadda**

2. Ilme kasta wuxuu xaq u leeyahay in laga warbixiyo fal kasta oo u muuqda xad-gudub la kula kacay iyada oo loo gudbinayo hay'addii ay khusaysay
3. Hay'ad kasta oo loo gudbiyay warbixinta xad-gudubka ilmaha waxaa waajib ku ah in ay xil iska saarto iyada oo kaashanaysa hay'adaha kale ee ay khusayso
4. Xogaha la xidhiidha ilmaha waxaa loo kaydinayaa ama loo gudbinayaa si waafaqsan xeerka

**CUTUBKA SHANAAD**

**XAQA ADEEGGA KAALMO SHARCI**

**Qodobka 32aad**  
**Xaqa Ilmuu U Leeyahay Kaalmo Sharci Oo Bilaash Ah**

1. Ilme kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo adeeg kaalmo sharci oo bilaasha ah dhammaan dacwadaha
2. Wasaarada Cadaalddu ayaa waajib ka saaran yahay inay siiso kaalmo sharci ilme kastaa oo la jebiyay xuquuqdiisa ku suntan Xeerkan ama xeer kale.
3. Kaalmo sharci waxa ka mid ah metelaad iyo talo sharci oo ku aadan xuquuqda caruurta iyo hababka sharci ee dacwadaha ciqaabta iyo kuwa madaniga ah loo maro.

**Qodobka 33aad**  
**Gudidda Qaran Ee Ilaalinta Xuququda Carruurta**

1. Xeerkan waxaa lagu aas-aasay Guddi Heer Qaran oo loogu yeedhayo Gudida Qaran ee Xuquuqda Carruurta.
2. Gudida Qaran ee Xuquuqda Carruurtu waxay ka koobantaha.
  - a. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arimaha Bulshada
  - b. Agaaasimaha Guud ee Wasaaradda Waxbarashda iyo Sayniska
  - c. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka;
  - d. Agaaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddalaada
  - e. Agaaasimaha Guud ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha
  - f. Agaaasimaha Guud ee Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta
  - g. Agaaasimaha Guud ee Wasaaradda Dhallinyarada iyo Ciyaaraha
  - h. Agaaasimaha Guud ee Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta
  - i. Ku xigeen Xeer-ilaaliye Guud oo uu soo magacaabo Xeer-ilaaliyaha Guud
  - j. Hogaanka Saldhigiyada Ee Ciidanka Booliiska
  - k. Hoggaanka Xabsiyada Ee Ciidanka Asluubta
  - l. Xubin ka socota Gudida Qaran ee Xuquuqal Insaanka
  - m. Xubin ka socota Guddida Caddaaladda

**Qodobka 34aad**  
**Xilka iyo Waajibaadka Guddida Qaran Ee Ilaalintaa Xuquuqda Carruurta**

1. Ujeeddada loo aas-aasay Gudida Qaran ee Xuquqda Carruurta iyo waajibaadkooda waxaa lagu faah-faahinayaan Xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirku kaddib marka uu la tashado isla markaaana la kashado hay'adaha ay khusayso

**CUTUBKA LIXAAD  
DANBIYADA IYO CIQAABAHA**

**Qodobka 35aad  
Danbiyada Lagu Soo Oogo Carruurta Iyo Ciqaabaha**

1. Danbiyada lagu soo oogo carruurta waxaa loo raacaya xeerarka dhaqan-galka ah ee khuseeya hannaanka garsoor ee u gaarka ah carruurta
2. Ilmaha laguma xukumi karo xadhig ciqaabeed
3. Ilmaha sharciga khilaafa waxaa loo samaynayaa xabsi ka leexin
4. Carruurta waxaa lagu haynayaa muddada baadhista dacwadda goob ku habboon xaaladda ilmaha

**Qodobka 36aad  
Danbiyada Laga Galo Carruurta Iyo Ciqaabaha Ka Dhalanaya**

1. Danbiyada laga galo carruurta waxaa loo raacaya xeerka dhaqan-galka ah ee khuseeya carruurta sida Xeerka Ciqaabta Guud

**Qodobka 37aad  
Laalis Iyo Tirtirid**

1. Waxa halkan si toos ah loogu laalay qodob kasta oo ku jra xeer kale oo dhaqan-gal ah oo tilmaamaya Xuquuqda Carruurt
2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn farqadaha hore ee qodobkan, amarrada ama xeer-nidaamiyayaasha ama ficillada loo qaaday si waafaqsan xeer dhaqan-gal ah way sii ahaanayaan dhaqangal ilaa la laalo ama wax looga bedelo si waafaqsan qodobada Xeerkan.

**Qodobka 38aad  
Awoooodda Soo Saarista Xeer-Nidaamiyayaal**

1. Si waafaqsan qodobbada Xeerkan, Wasiirku wuxuu soo-saari karaa xeer-nidaamiyayaal tilmaamaya hanaanka loo fulinayo Xeerkan.